

Siyaasadda JBA- Kala-sooca Ku saleysan Jinsiga, Dhalashada ama Nooca (Sinaanta Noocyada dadka)

Guddiga Waxbarashadu wuxuu ogsoonyahay in dhammaan ardayda dhigata degmada dugsiga ayada oo aan la eegayn nooca, jinsiga ama asalka dhalashada ay yihiin kuwo si siman xaq loogu siiyay ka faa'ideysiga waxbarasho wannaagsan. Fursadaha manhajku waa in ay noqdaan kuwo ka maran eex jinsi ah.

Waxay noqon doontaa mas'uuliyada dhammaan shaqaalaha degmadu in ay hubsadaan carqaladaha necbaanta, midab takoorka iyo jaahilnimada in aysan hor istaagin waxbarashada. Fursad waxbarasho ee isku midka ah waxaa si dhakhso ah lagu gaari karaa marka dugsiga iyo bulshadu diyaariyaan xaalado, u oggolaanaya arday kasta in uu horumariyo awoodiisa buuxda.

Fursadaha waxbarasho waxay noqon doonaan kuwo si baddan looga dareemi karo dhammaan ardayda oo dhan ayada oo aan la eegayn nooca, asalka dhalashada ama jinsiga.

Ugu danbaysta, Gudiga wuxuu garanayaa in fahan buuxda ee ku dhisan sinaanta noocyada dadku ee aasaaska waxbarasho ay ku dhiirinayso dhammaan ardayda in ay k asoo qayb galaan dhammaan koorsooyinka la bixinayo.

La aasaasay Abriil 1993

TIXRAACA SHARCIGGA.: Cinwaanka IX Sixida Waxbarasho 1972, 20 U.S.C. §1681
Samaynta Fursadaha Waxbarasho ee Isku midka ah 1974, 20 U.S.C. §§1701-1758

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: AC, Aan jirin midab takoor
ACA, Aan jirin midab takoor Ku saleysan Jinsiga
JB, Fursadaha Waxbarasho ee Isku midka ah